

Xaashida Xogta ee Waalidka/Masuulka

10/2022

Barnaamijka Kahortaga Cagaarshoow B ee Hooyada iyo Dhalaanka ee Ismaamulka San Diego (PHPP) ayaa siinaaya maaraynta kiiska iyo taageero hooyooyinka, qoysaska, iyo adeeg bixiyaasha Caafimaadka ee maxaliga ah ayagoo yoolku yahay kahortaga faafinta caabuqa Cagaarshoow B ee hooyada, ama hooyadu qaadsiiiso ilmaha.

Inta aad uurka leedahay:

- Dhakhtarkaaga ayaa amri doona **shaqada shaybaarka** si lagaaga baaro Cagaarshoow B
 - ◆ Sida haboon waa in lagaaga baaro Cagaarshoowga B biloowga uurka, xataa haddii lagu baaray intii aad uurkii hore lahayd.
- Haddii aan ogaano in haweeney ay uur leedahay ayna qabto Cagaarshoow B, waxaa laga diiwaan gelin doonaa barnaamijkeena lacag la'aanta ah

Marka laga diiwaan gasho barnaamijkeena, waxaad filan kartaa:

- **Wicitaanka taleefanka** oo kaaga imaanaaya midkood maareeyaasheena kiiska ee kalkaalinta
 - ◆ Wicitaanka taleefanka ee hore: waxaan ku aruurinaynaa xog ku saabsan meelaha lagaaga xariiraayo, dhakhaatiirtaada, waxaana kugu siinaynaa wacyi gelin la xariirta Cagaarshoowga B /barnaamijkeena
 - ◆ Kadib wicitaanka taleefanka ee koobaad: **waraaq horudhac ah** ayaa boostada laguugu soo diri doonaa si lagu siiyo xog dheeraad ah iyo kaarka ganacsiga ee maareeyaha kalkaalinta kiiskaaga
 - ◆ Maareeyaha kalkaalinta kiiskaaga ayaa kala shaqayn doona isbitaalka aad ku dhali doonto iyo dhakhtarkaaga daryeelka hooyada iyo ilmaha si loo xaqiijiyoo in kooxdaada caafimaadku ka war qabaan inaad qabto Cagaarshoowga B ayna u diyaar garoobaan inay ilmahaaga siiyaan talaallada uu u baahan yahay markuu dhasho
- Waxaan sidoo kale kugu **boorinaynaa** inaad la xariirto dhakhtarkaaga guud si aad u hubiso haddii uu ku talinaayo inaad u tagto dhakhtar taqasusle ah si laguugu sameeyo baaritaan dheeri ah iyo/ama daawayn

Kadib marka ilmahaagu dhasho:

- Cunugaaga ayaa la siin doonaa **Talaalka Cagaarshoowga IYO Difaaca Cagaarshoowga B ee Globulin (HBIG)** markuu dhasho
 - ◆ Labada talaalka waa in la siiyaa **12 saacadood kadib dhalasha**, ayadoo looga dhufanaayo meelo **kaladuwan**
 - ◆ Labadaba talaalka iyo HBIG waa loo baahan yahay si ay gacan uga gaystaan ka **difaacida** ilmaha Cagaarshoowga B
- Cunugaaga ayaa intaas kadib buuxin doona midkood **3 ama 4 taxaneyaasha talaalka cagaarshoowga B ah** oo uu siinaayo dhakhtarkiisu
- **Baaritaanka Difaaca ee kadib talaalka (PVST)** ayuu amri doonaa dhakhtarka cunugaaga marka cunugaaga la siiyo tirada saxda ah ee talaalka xiliyada ku haboon
 - ◆ PVST waa baaritaan dhiiga ah oo lagu sameeyo labo baaritaan: **Raadinta Jiritaanka Raadka Cagaarshoowga B (HBsAg) iyo baaritaanka Difaaca Cagaarshoow B (anti-HBs)**
 - ◆ Baaritaannadaan ayaa noo sheegaaya in cunugaagu haysto difaac uusana qabin Cagaarshoowga B
 - ◆ Haddii cunugaagu uusan haysan difaac ku filan, dhakhtarkaaga ayaa u baahan kara inuu cunugaaga ku talaallo kuurooyin dheeraad ah iyo inuu dib u qaado baaritaanka



Nagalasoo xariir - Taleefanka: 866-358-2966 Dookha 5

Fakiska: 619-692-5677

Iimeel Amaan ah: PHS-PerinatalHepB.HHSA@sdcounty.ca.gov

